# Hordhaca Waxbarashada loo wada dhan yahay ee lasiinayo ururada dadka naafada ah

Xirmo

1



## Buugga ka-qayb-galayaashada


Waxaa loo diyaariyey:

Puntland Disability Organizations Network (PDON), Somalia
Disability Aid Foundation (DAF), Somalia
Adventist Development and Relief Agency (ADRA), Somalia
Save the Children, Somalia
Norwegian Association of Disabled

Waxaa diyaarisay:

Enabling Education Network, August 2020

[Sharaxaada sawirka: Sawirka buugga jeldigiisa wuxuu muujinayaa koox dad ah oo fadhiya agagaarka miiska yaala qolka tababarka. Nin ayaa ku fadhiya gaari naafada. Gacmaha ayey kor u taagayaan qaar ka mid ah dadka, oo waa ay wareejinayaan sidii iyaga oo ciyaaraya. Qof kasta waa ilka cadeynayaa ama qoslayaa. Waxaa miiska dul saaran waraaqo, buuggaag iyo qalimo, oo derbiga waxaa ku dhegan waraaqo waaweyn.]

Buugaan waxaa laga heli karaa creative Common licence attribution. Wixii xog dheeraad ah, booqo: https://creativecommons.org/licenses/by-nc-sa/4.0/legalcode

# Tusmo

1. Acronyms ........................................ 4
2. Muxuu yahay Buuggani, yaase loogu talo galay? ........................................ 5
3. Sidee wax u baranaa? ........................................ 8
4. Takoorka ........................................ 14
5. Waa maxay nidaamka waxbarashada? ........................................ 22
6. Maxay tahay waxbarashada loo dhan yahay? ........................................ 26
8. U-qareemaha waxbarashada loo wada dhan yahay ........................................ 50
9: Samaynta wacyi gelin bulsho oo ku saabsan waxbarashada loo wada dhan yahay ........................................ 56
10. Sii wadida barashada waxbarashada loo wada dhan yahay ........................................ 58

# 1. Acronyms

| | |
|---|---|
| ADRA | Adventist Development Relief Agency |
| CBO | community-based organisation |
| DAF | Disability Aid Foundation |
| EENET | Enabling Education Network |
| IDP | internally displaced person |
| NAD | Norwegian Association of Disabled |
| NGO | non-governmental organisation |
| PDON | Puntland Disability Organizations Network |
| OPD | Organisations of People with Disabilities |
| SEND | special educational needs and/or disability |
| SIT | school inclusion team |
| ToT | training-of-trainers |

# 2. Muxuu yahay Buuggani, yaase loogu talo galay?

Buuggan waxa loogu talo galay ka-qayb-galayaasha ka socda ururada dadka naafada ah (OPD), waana tababbabar aasaasi ah oo ku saabsan waxbarashada loo wada dhan yahay.

Ujeeddada ugu weyn ee tababarku waa in la baro xubnaha ururada dadka naafada ah waxbarashada loo wada dhan yahay iyo sida loo dhaqan gelin karo. Casharada waxaa ku jira casharo laga soo qaatay tababaro kala duwan.

Tababarku waxa kale oo uu xooga saarayaa xifada u-qareemida iyo sida ugu wanaagsan ee ay ka-qayb-galayaashu ugu qareemi karaan waxbarashada loo wada dhan yahay ee bulshadooda.

Tababarkani waxa uu qayb ka yahay tababar mid muddo dheer socon doona oo ku saabsan kor u qaadista kartida Ururada Dadka Naafada ah (OPDs). Tababaro dheeraad ah oo ku salaysan tababarkaan ayaa la diyaarin doonaa.

Waxbayarashada loo wada dhan yahay **ma aha** in caruurta naafada ah ay dugsiga dhigtaan oo kaliya. Waxay ku saabsan tahay in la hubiyo in arday kasta uu dugsiga joogo, oo ka qayb-galo barashada, hawl-qabadka bulshada, oo guul ka gaarayo waxbarashada sida ugu waanaagsan ee awoodiisa.



[Sharaxaada sawirka: Horey waxaa ka muuqda labo gabdhood, mid waxa ku dhacay cudurka baraska, waxay fadhiyaan dhulka, iyagoo qoslaya oo ay dhexdooda taalo warqad weyn oo ay qoraal iyo sawiro ku qoran yihiin. Gadaal waxaa ka muuqda labo wiil, mid baa ul ku socda, warqad weyn oo derbiga ku dhegan ayey wax ku dhejinaayaan. Dhinaca midig, waxaa ka muuqda arday oo miis dhicanyada ka fadhiya, labo waa gabdho, midna waa wiil. Macallin ilka cadaynaya ayaa ag taagan. Dhammaantood waxay ay ku jiraan fasalka, iyagoo haysta warqad wax ku qoran yihiin oo derbiga lagu dhejinayo.]




[Sharaxaada sawirka: saddex gabdhood oo ku ciyaaraya bannaanka dugsiga. Gabar ayaa ku fadhida gaariga naafada oo xarig afkiisa haysa, mid kalena waxa ay haysaa xriga afkiisa kale. Gabdha saddexaad ee dharka buluugan waxa ay ka boodaysaa xariga. Way ilka cadaynayaan.]

# 3. Sidee wax u baranaa?

Ka hor inta aan ka fekerin waxbarashada loo wada dhan yahay, waa muhiim in aan ka fekerno sida aan wax u barano- caruurta iyo dadka waaweyn. In la fahmo siyaabaha kala duwan ee ay barashadu u dhacdo, waxa ay inaga caawinaysaa in aan si wanaagsan u taageerno habka loo wada dhan yahay ee barashada, kaas oo ka bilaabmaya guriga iyo bulshada dhexdeeda iyo sidoo kale dugsiga.

Dad badan waxa ku fekerayaan in ay barashadu dhacdo oo keliya marka ay caruurtu dugsiga bilaabaan, hase yeeshee caruurtu waxa ay barashada bilowdaa marka marka uu dhasho isla markiiba. Fursado badan oo waxbarasho ayaa ka jira guriga iyo bulshada dhexdeeda, kuwaas oo jiraya inta la nool yahay.

**Barashadu waxay ka dhacdaa meel kasta, waqti kasta oo qof kasta wax waa baran karaa.**

- ü Ciyaaruhu waa meelaha ugu muhiimsan ee a caruurta wax ka bartaan.
- ü Caruurtu waxa ay wax ku bartaan in laga qayb-geliyo shaqado maalmeeda iyo hawlaha guriga.
- ü Barashadu kama dhacdo dugsiga oo kaliya.
- ü Looma baahna agab gaar ah si loo taageero waxbarashada guriga.
- ü xirfada bulshonimo, bed-qabka shucuurka, hal-abuurka iyo caafimaadka jirka . Kuwaas oo dhan way isku xiran yihiin si ay aasaas adag ugu noqdaan barasho kasta. Sida ugu wanaagsan oo aad ku xasuusan karto dhinacyada caruurnimada laga koro waa:  Bulshanimo, Jir, Maskax, Hal-abuur iyo shucuur.
- ü Waalidku waxa ay leeyihiin xirfad badan oo ay la wadaagi karaan caruurtooda.

| |
|---|
| Wax baan baranaa, sababtoo ah waan u baahanahay. Waxaan wax ku baranaa samaynta, dhaqangelinta iyo taageerada. Ku wani waa siyaabo ay wax ku bartaan caruurta iyo dadka waaweyn. |

Sawirada boggaga soo socda waxay ina tusinayaan in barashadu ay u dhacdo siyaabo kala duwan.



[Sharaxaada sawirka: labo qof oo is dhinac taagan. Mid baa gar leh. Labaduba waxa ay dhaqayaan weel. Labaduba waa heesayaan, iyagoo afka kala haya. Daaqad furan ayaa ka dambaysa. Shimbiro ayaa gadaal ka ciyaya.]

## Xogta Tababaraha

**Waxbarasho noocee ah ayaa dhacaysa?**

**Xirfada Nolosha:** Caruurtu waxay bartaan xirfado nolosha aasaas u ah, iyaga oo qabanaya shaqada guriga. Waa arrin u muhiimsan wiilasha sidoo kale gabdhaha in shaqadaas laga qayb-galo si looga hortago in dumarka kaliya ay qabtaan shaqada guriga.

**Erayada iyo laxanka:** in hees si wada jir ah loo qaado waa arrin weyn ee ku saabsan sida ay caruurtu u baran karto erayada iyo macnaha laxanka iyo hal-abuurka.

**Dhegaysiga waxyaabaha dabeeciga ah:** (shimbiraha ka heesaya daaqada) Waxay caruurta ka caawinayaan inay koriimo sameeyaan, mahadiyaana deegaanka dabiiciga ah.





[Sharaxaada sawirka: haweenay weyn oo ku fadhida gaariga naafada oo gacmaha ka hadlaysa. Summadaha hadalku waxa ay muujinaysaa inay sheekaynayso ama riyo sharxayso. Waxa kale oo ay muujinaysaa qof haween weyn u eg oo huruda. Haweyneydu waxa ay ku riyooneysaa iyada oo duulaysa. Koox dad waaweyn iyo caruur ay da'doodu kala duwan tahay oo uu ku jiro cunug baras ku dhacay ayaa fadhiya dhulka. Wajiyadooda waxaa ka muuqata inay iney dhegaysanayaan haweenta.]

## Xogta tababaraha

**Waxbarasho noocee ah ayaa dhacaysa?**

**Erayada iyo afka:** sheekada haddii ay tahay mid malo-awaal ah ama sheeko dhab ah waxa ay si weyn u horumarisaa barashada afka/luuqada ee caruurta, sidoo kale hal-abuurka iyo in si xasaasi ah loo fekero.

**Dhaqanka deegaanka:** Dhegaysiga sheekadu waxay caruurta baraan inay mahadiyaan dhaqanka deegaanka iyo asalka qiyam gaar ah.



[Sharaxaada sawirka:  Gabar yar oo biyo ku shubaysa geed dheri ku jira. Summada hadalka waxay muujinaysaa gabar su’aal is weydiinaysaa. Nin ayaa ag istaagan  oo hadlaya oo haddana gacmaha ka hadlaya. Summada hadalku waxay muujinaysaa in gabadha iyo ninku ay  ka doodayaan geed miro badan dhalay.]

## Xogta tababaraha

**Wax barasho noocee ah ayaa dhacaysa?**
**Xirfada Nolosha:** Barshadu aasaas ayey u tahay xirfada nolosha sida  in dhirta la beero, taas oo muhiim u ah caruurta. Caruurta waxa kale oo ay ka baranayaan mas’uuliyada ka saaran walxaha nool- dhirta iyo in la xanaaneeyo maalin kasta.
**Dulqaadka iyo indha indhaynta:** Dhirtu waxa ay u kortaa si deg deg ah, sidaas darteed caruurtu waxay ka baranayaan dulqaad iyo xirfada indha indhaynta maadaama ay u kuur gelayaa koristeeda.
**Dadka kale wax ka baro:**  Wax ka baro dadkale ee qoyska ama bulshada ka mid ah ee leh xirfad aadan lahayn.



[Sharaxaada sawirka:  Cunug yar ah oo dhulka fadhiga oo usha lagu socdo ay dhiniciisa taalo. Waxa uu haystaa dhowr shay, biyo weel ku jira ayuu mid kale ku shubayaa. Afkuu kala hayaa oo waxa ka muuqda summada hadalka calaamad su’aal madaxiisa ka saraysa.]

## Xogta Tababaraha

**Wax barasho noocee ah ayaa dhacaysa?**

**Xisaab, Saynis iyo Fiisigis:** Barshada ku saabsan mugga, qiyaasta, tirada ee dareeraha iyo adkaha.

**Indha indhayn iyo tijaabo:** Sida muggu iyo tiradu ay isugu bedelaan weelal kala duwan.

**Xaalada jirka iyo xirfada muruqyada:** In si taxadar leh dareere ku jira lagu shubo weel kale.

## Waa maxay sababta ay lagama maarmaan ugu tahay waxbarashada loo wada dhan yahay si loo fahmo sida aan wax u barano?

Waa arrin muhiim ah, sababtoo ah waxay caawinaysaa:

ü In macallimiintu ay ka fekeraan sida ugu wanaagsan ee ay u taageeri karaan barashada dugsiga iyo fasalka.

Ø Waxaa ka mid ah in fasalka dhexdiisa loo adeegsado hawl-qabadyo hal-abuur ah iyo is-dhexgal badan sida **Koox u shaqayn, dhibta oo loo maareeyo si wadajir ah, iyo in laysla wadaago sheekooyinka iyo fikradaha(**waxaa loogu yeeraa habka barista ee uu ardaygu xudunta u yahay)

ü In waalidku ay ka fekeraan sida ugu wanaagsan ee ay u taageeri karaan barashada guriga iyo bulshada dhexdeeda.

Ø Waxaa ka mid ah in fursado barasho laga sameeyo guriga iyo bulshada dhexdeeda, iyagoo la adeegsanayo hawl-maalmeedka sida **karinta, beerista, iyo barashada xifrad cusub oo laga barto qoysaska kala duwan iyo bulshada.**



[Sharaxaada Sawirka: saddex qof oo ku ciyaaraya alaabta iyo dhoobo. Gabar ayaa derbi ka dhistay dhoobo iyo caagadaha biyaha. Cunug ayaa riixaya baabuur yar oo laga sameeyey caagadaha saliida cuntada. Gabar ayaa taagan oo cunug xambaarsan. Waa ay ka taxaderaysaa cunuga, iyada oo ul iyo caagad haysata.]

# 4. Takoorka

Haddiii aan fahano asalka takoorka, waxaan takoorka ka joojin karnaa cid kasta iyo koox kasta. Taas oo macnaheedu yahay inaan nahay dhammaantayo kuwo wadajira oo qof iyo kooxba ka-wada-qayb-galnay.

## Muxuu yahay takoorku?

Takoorku waxa uu dhacaa marka koox ama shaqsi bulshada ka mid ah loola dhaqmo si xun oo baabi'inaysa xaqa ay u leeyihiin sinaanta iyo khayraadka.




[Sharaxaada sawirka:  Dhinaca bidix ee hore, waxaa ka muuqda saddex wiil oo dhalinyaro ah oo dhulka fadhiya, oo hortooda ay yaaliin kabo. Wiilashu waxay tirtirayaan kabaha. Wiilka bidixda u xiga waxa hortiisa taal ulo lagu socdo. Wiilasha hortooda, nin ayaa kursi ku fadhiya, oo lugiisa kor u haya si kabaha loogu tirtiro. Gadaal waxaa ka muuqda dukaamo iyo dad adeeg gadanaya. Dugsi ayaa gadaal ka muuqda sidoo kale.]

## Xagee ka yimi takoorku muxuuse u dhacaa?

- Dadku ma ogsoona inay wax takoorayaan, waxa ay ula muuqataa in tahay dabeecad caadi ah oo la aqbali karo.
- Bulsha kasta waxaa ka dhex jira sheekooyin badan oo khiyaali ah (sida in dumarku aysan ganacsi samaysan karin ama caruurta naafada ah aysan wax baran karin). Caruurtu waxa ay ku barbaartaa dhegaysiga dadka waaweyn oo ka sheekaynaya sheekooyinka khiyaaliga ah (sida dadka naafada ah ma shaqayn karaan, gabdhuhu kuma fiicna xisaabta ama waxay maqleen macallimiinta ama dadka waaweyn oo caruurta baahida gaarka leh ama naafada ah ugu yeeraya 'damiin' ama 'doqon'). Caruur waxa ay aaminayaan in sheekooyinkaasi ay run yihiin. Marka ay weynaadaan waxa ay ku sheekaynayaan sheekooyin kaas oo waa ay ku dhaqmaan (sida inay ka yaabaan haweenay dhaqtar ah, sababtoo ah waxa ay aaminsan yihiin in aysan u wanaagsanayn sida ninka dhaqtarka ah ama in aan wax la barin ama la shaqaalaysiin qof naafo ah, sababtoo ah waxa ay aaminsan yihiin in aan wax la bari karin oo la shaqaalaysiin karin). Hab dhaqankan ku salaysan sheekooyinka khiyaaliga ah waa takoor.
- Dadku cabsi darteed ayey wax u takooraan. Tusaale, waxa suurogal ah inay ka baqaan koox gaar ah oo dadka ka mid ah oo ay aaminsan yihiin in ay nasiib xun yahiin (sida cabsi laga qabo in dadka naafada ah ay inkaar qabaan) ama in cabsi laga qabo in dadka qaarkiis ay doonayaan in ay qaataan wax muhiim ah (sida in haddii ay kororto tirade dadka barakacayaasha ah ay tayada waxbarashadu hoos u dhacayso). Inta badan cabsidaasi waa kuwo ku salaysan sheekooyin khiyaali ah iyo fahan xumo.
- Waxaa suurogal ah in dadka qaarkiis ay dadka u takooraan si ay u ilaashadaan ama ay u samaystaan awood. Waxa ay aaminsan yihiin inay awood yeelanayaan haddii ay inkiraan xuquuqda iyo xoriyada kooxo dadka ka mid ah.

## Meertada Takoorka

**Cunug ahaan**: waxaan aqbalnaa wixii aan ogaano iyo waxa uu dadku noo sheego (ee ku saabsan jinsiga, qaxootiga, naafada, iwm). Tusaale, in aan haweenku shaqayn karin, barakacayaashu ay si xun u saameynayaan waxbarashada dugsiga iyo in aan dadka qaarkiis wax baran karin.

**Dhalinyaro ahaan:** hareerahaan eegnaa oo waxaa fiirinaa caddeymaha, kuwaas oo run ka dhigaya sheekooyinka khiyaaliga ah, sida in tiro yar oo haween ah ay injineero yihiin, in barakacayaashu ay adeeg guud iyo dhul qaadanayaan, iyo in dadka naafada ah dugsiga laga faquuqo.

**Dadka waaweyn:** Waxaan yeelanay aaminaad ku salaysan wixii aan horey u soo marney ayadaana ku shaqeynaa sida inaan shaqo gaar ah siino gabadhaha, inaan u aragno in barakacayaashu si aan cadaalad aheyn wax loogu badiyo, ka fogaanshaha dadka naafada ah iyo qoysaskooda. Markii aan ku shaqayno aaminaadaas, dadka ayaan takoornaa.

Hab dhaqankeenu waxa uu abuuraa oo joogteeyaa nidaam sinaan la'aan ah, kaas oo sameeya siyaasada, deegaanka iyo qaab-dhismeed lagu takooray dadka qaarkii. Caruurtu xaaladan ayey ku dhasheen, arrintu meertadaas ayey ku soconaysaa.


[Sharaxaada Sawirka: Bogga soo socda waxaa ku qoran jaantuska ka kooban afar sawir oo midba midka kale ku xiran yahay, iyadoo la adeegsaday falaar. Erayga 'meertada takoorka' ayaa dhexda ku qoran. Sawirka sare ee jaantuska waxa uu muujinayaa gabar dhalinyaro ah oo guri nadiifinaysa oo uu baaldi ag yaalo. Waxaa gadaasheeda yaala fadhi iyo labo sawir oo derbiga ku dhegan, mid waxa uu muujinayaa afar qof (labo waaweyn iyo labo yaryar), kan kale waxa uu muujinayaa labo caruur ah. Wiil soconaya ayaa dhaafay gabadha guriga tirtiraysa. Waxa uu xiran yahay dharka dugsiga, oo waxaa dhabarka u saaran boorso. Gabadhu waxa ay fiirinaysaa wiilka oo way caraysan tahay. Sawirka dhinaca midig ee jaantuska waxa uu muujinayaa afar caruur ah oo fasal fadhiya. Labo gabdhood ayaa is dhinac fadhiya, oo waxa ay fiirinayaan sawir buug ku qoran. Sawirka buugga ku qoran waxa uu muujinayaa haweenay cunto karinaysa iyo nin qoor xir xiran oo gacanta ku haysta boorsada gacanta. Haweenayda wajigeeda waxaa ka muuqata murugo. Sawirka hoose ee jaantuska waxa uu muujinayaa gabar qaangaar ah oo aan dharka dugsi xirnayn oo cunug xanbaarsan. Waxay taagan tahay dugsiga bannaankiisa oo wax bay eegaysaa. Way caraysan tahay. Labo gabdhood oo dharka dugsiga xiran oo wada hadlaya ayaa dugsiga hor taagan oo gabdha fiirinaya. Sawirka bidixda ee jaantusku waxa uu muujinayaa haweenay kursi ku fadhida oo digsi ku jarjaraysa khudaar. Gabar yar oo khudaar jarjaraysa ayaa ag fadhida. Muuqaalka wejiga ee gabadhu waxa ka muuqata inaysan faraxsanayn. Haweeynaydu waxay u muuqataa mid ruqsaysatay oo welwelsan. Ma wada hadlayaan. Digsi baa dab u saaran.]







# Meertada Takoorka




## Xaquuqda insaanku waa aasaaska waxbarashada loo dhan yahay

Marka aan ka fekerayno waxbarashada loo wada dhan yahay, waxaa muhiim ah in aan xasuusano in qof kasta uu xaquuq u leeyahay waxbarasho.


- Xaquuqda insaanku waa **sharci damaanad** ah oo laga fuliyo dunida oo dhan. Waxay qofka iyo bulshada ka ilaaliyaan falal lidka ku ah (ama aan wax loo qaban xoriyadooda, xuquuqda iyo sharafta bini'aadanka.
- Qof kasta xaq buu leeyahay- taas macnaheedu waa in qof kasta uu leeyahay xuquuqda insaanka. Dhammaanteen waxaan leenahay xaquuq isku mid ah.
- Dhammaanteen xil baa ina saaran. Taas macnaheedu waa in aan dhammaanteen dhowro xuquuqda insaanka oo aan lagu xadgudbin. Dawladu waa in ay kaalin weyn ka qaadataa ilaalinta xaquuqda insaanka, hase yeeshee inaguna macallimiin ahaan, waalid ahaan, iyo bulsho ahaan waa inaan ilaalinaa xaquuqda insaanka. Tusaale, macallin ama waalidka waxaa xil ka saaran yahay inay ilaaliyaan xaquuqda waxbarasho ee arday kasta.

**Waxbarashada loo wada dhan yahay waxa ay ku saabsan tahay ka gudbitaanka takoorka iyo taageerida nidaamka waxbarasho si cunug kasta uu u helo xaquuqdiisa waxbarasho.**

**Sidaas, darteed muxuu yahay nidaamka waxbarashadu?**



Xoriyada qowika




Waxay xaq leeyihiin
inay heelaan waqti
ay ku nastaan




Xuquuqda dhaqdhaqaaqa

## Tusaalooyin ku saabsan xaquuqda insaanka




Xaquuqda
sharciga



Xuquuqda




Xuquuqda ka qayb-qalka siyaasada



Xuquuqda shaqada

[Sharaxaada sawirka: sawirka boggii hore waxa uu muujinayaa todobo tusaale oo ku saabsan xaquuqda insaanka oo qoraal ahaan iyo sawir ahaan u qoran. Marka kor laga soo bilaabo midigta, waa tusaalaha koowaad oo ku saabsan xaquuqda in la helo waqti la nasto. Sawirku waxa uu ka kooban yahay saddex sawir xariiqeed oo kubad ciyaaraya, waxaa ka mid ah haweenay iyo qof ul ku socda. Tusaalaha labaad waa 'xaquuqda daryeelka sharciga'. Waxa uu sawir kani ka kooban yahay afar sawir uleed sida nin, haweenay, cunug iyo qof gaariga naafada saaran iyo summad weyn oo u eg qof dheer oo labada gacmood wax ku ilaalinaya iyo erayga sharci oo ku qoran dhexda. Tusaalaha saddexaad waa 'xaqa shaqada'. Waxa uu sawirkani ka kooxan yahay afar god oo mid kasta ku jiro hal sawir xariiqeed. Mid dhulka ayuu qodayaa, mid kale oo gaariga naafada wata oo miis hor fadhiya, mid kale oo koofiyad xiran oo gacanta wax dheer ku haysta, mid ka ugu dambeeya waa haweenay madaxa dambiil wax ku jiraan u saaran tahay. Tusaalaha afraad waa 'xuquuqda ka-qayb-galka siyaasada' sawirkani waxa uu muujinayaa lix qof oo sawir uleed ah oo ku fadhiya fadhi kala sareeya oo sidii fadhi masraxeed rasmi ah. Erayga 'Golasha shacabka' ayaa dhexda ku qoran, Dhexda waxaa taagan qof gaariga naafada ku fadhiya iyo qof kale oo ka soo horjeeda. Labaduba waxa ay haystaan cod-baahiye. Tusaalaha shanaad waa 'xaquuqda waxbarashada'. Sawirkaan waxa uu ka kooban yahay labo buug oo is dul saara oo ay ka sarayso koofiyada qalin-jebinta. Tusaalaha lixaad waa 'xaquuqda dhaqdhaqaaqa' Sawirkan waxa uu muujinayaa khariidada Afrika. Dhinaca sare waxaa ka muuqda gaariga naafada oo uu raadkiisii ka dambeeyo, kaas oo muujinaya dhaqdhaqaaq. Dhexda waxa ku jira haweenay gacanta cunug haysa oo uu raadkeedii ka dambeeyo, taas oo muujinaysa dhaqdhaqaaq.  Dhinaca hoose waxa uu muujinayaa qof hoos u socda oo waxaa ka dambeeya raadkiisii oo muujinaya dhaqdhaqaaq. Tusaalaha todobaad waa 'xoriyada qowlka'. Dhinaca midig, waxaa ka muuqda qof cod-baahiye haysata oo ku hadlaya.  Dhinaca bidix, waxaa ka muuqda saddex qof oo wax dhegaysanaya.]

# 5. Waa maxay nidaamka waxbarashada?


Inta badan nidaamka waxbarasho ee wadamadu waa mid adag. Waxa uu ka kooban yahay qaybo badan oo isku xiran oo wadajir u wada shaqaynaya. Nidaamka waxbarashada waxa kale oo loo bahan yahay inuu ku xiran yahay qaybaha kale. keligiis gooni si waxtar leh uma shaqayn karo.

Dalal badan waxa ay leeyihiin nidaam waxbarasho oo ka kooban qaybo badan sida:

- Sharciyo iyo siyaasado la xiriira xuquuqda iyo adeega waxbarashada
- Maxkamado iyo hay'adaha kale oo  ilaaliya xuquuqdaas
- Waaxyaha dawlada, koox ama shaqsiyaad oo mas'uul ka ah qaybaha kala duwan ee waxbarashada (sida miisaaniyada, manhajka, imitixaanada, agabka barista iyo barashada, tababarka iyo shaqaalaysiinta macallimiinta, kaabayaasha dhaqaalaha).
- Macalimiinta iyo shaqaalaha kale
- Dugsiga, guddonka waxbarashada degmada, maamulayaasha, guddiyada
- Adeega waxbarashada (sida dugsiyada, xurumaha agabka, kulliyadaha, jaamacadaha)
- Ardayda, waalida, qoysaska iyo bulshada
- Arrimaha la xiriira waxbarashada sida fayadhawrka dugsiga, gadiidka, , tiknoolijiyada iyo iwm.

Si ayey isugu wada xiran yihiin dhammaan nidaamka waxbarashadu. Is bedelka ku dhaca mid ka mid ah nidaamka waxbarashada waxa uu saameynaya qayb kale oo ka mid ah nimaadka waxbarashada. Haddii laysku dayo in is bedel lagu sameeyo nidaamka, waxaa suurogal ah in lagu guuldaraysto haddii uusan is bedelkaasi saamayn qaybo kale oo nidaamka ka mid ah (sida haddii la isku dayo in wax laga bedelo barista iyo barashada dugsiga, oo aysan saamayn manhajka iyo imtixaanka, is bedelkaasi lama saanqaadi karo isku dayga cusub). Sidaas darteed, waxbarashada waa in lagu wada daraa dhammaan qaybaha nidaamka waxbarashada si isku jiho loogu wado socdo.


Nidaamka waxbarashadu gooni isagama taagi karo qaybaha kale ee arrimaha dawlada iyo bulshada. Tusaale ahaan, waxa jirta baahi ah in waxbarashadu ku xiran tahay caafimaadka, garsoorka, arrimaha bulshada, shaqaleysiinta, ganacsiga, dhaqaalaha, dhaqanka, ciyaaraha, saxaafada, qaxootiga iyo socdaalka.


Nidaamka waxbarashada
Agabka barista iyo barashada
Xogta waxbarashada
Saraakiisha iyo maamulayaasha waxbarashada
Waalidka iyo bulshada
Arday
Macallimiinta
Imixaanda iyo qiimeynta
XEERARKA
SIYAASADAHA
Sharciyada iyo
DUGSI
Dugsiyada iyo goobaha
Miisaaniyad aiyo

[Sharaxaada sawirka: Sawirka bogga sare waxa uu eray ama sawir ku muujinayaa toban tusaale oo kala duwam oo uu ka kooban yahay nidaamka waxbarashada. Marka xaga sare laga soo bilaabo, sawirka dhexda ku jira, tusaalaha koowaad waa 'xogta waxbarashada'. Waxa uu ka kooban yahay dhaladada kumbuterka, looxa xarfaha iyo xirmo waraaqo ah oo ay wax ku qoran yihiin. Tusaalaha labaad waa 'saraakiisha iyo maamulayaasha waxbarashada'. Sawirku waxaa uu ka kooban yahay xirmo buuggaag balaaran ah oo miis dulsaaran yahay, gadaalna uu ka taagan yahay nin qoor-xir xiran. Tusaalaha saddexaad waa 'arday'. Sawirkan waa sawir uleed ka kooban shan qof oo caruur iyo dhalin yaro ah oo rag iyo haween isku jira, mid ayaa xiran muraayadaha indhaha oo madow, ulna ku haysa gacanta, mid kale waxa uu haystaa usha lagu socdo iyo gabar xiran xijaab. Tusaalaha afraad waa 'imtixaanada iyo qiimeynta'. Sawirkan waa sawir uleed muujinaya qof kursi ku fadhiga oo gacanta ku haya qalin warqad dul saaran, oo hoos eegaya. Gadaashii waxaa ku dhegan saacada derbiga. Tusaalaha shanaad waa 'miisaaniyada iyomaaliyada' sawirkani waa labo xirmo waraaqo bangi oo is dhinac yaal oo mid kasta ay qoran tahay summada doolarka maraykanka. Tusaalaha lixaad waa 'dugsiyada iyo goobaha waxbarashada' sawirkani, dhinaca bidix waxa ka muuqda dhisme saddex dabaq ah oo daaqado badan leh, oo ay hortiisa ku qoran tahay 'Jaamacad', dhinaca midig waxaa ka muuqda labo dhisme oo mid kasta ka kooban yahay saddex qol oo iska soo horjeeda oo tarniig dusha ka saaran yahay, oo ay ku hor qoran tahay 'Dugsi'. Tusaalaha todobaad waa 'sharciyada iyo siyaasada'. Sawirkani waa labo xirmo oo waraaqo ah. Mid waxaa dusha kaga qoran 'SHARCIYADA', tan kalena waxaa dusha kaga qoran 'SIYAASADAHA'. Tusaalaha sideedaad waa 'macallimiinta' Sawirkani waa sawir uleed muujinaya habeenay ul haysata oo sabuurada ay wax ku qoran yihiin ku tilmaamaysa. Tusaalaha sagaalaad waa 'waalidka bulshada' sawirkania waa sawir uleed muujjinaya koox ka kooban todobo qof oo ay ka mid tahay haweenay gacanta ku haysa cunug, mid ka kale oo gaariga naafada ku fadhida, nin dheer oo dhuuban qoor-xir xiran, nin gaaban oo buuran, haweenayda saddexaad iyo nin da' weyn oo ul ku tukubaya. Tusaalaha tobnaad waa 'agabka barista iyo barashada' sawirkani waa saddex buug oo mid balaaran yahay, midna xasuus qor yahay, mastarad, qalin-qori, qalin iyo tirtire.]

[Sharaxaada sawirka: Sawirka bogga soo socda waxa uu muujinayaa jaanus uu dhexda kaga qoran yahay erayga 'qaybta waxbarashada' oo ay xariiqo ku xireen todobo sanduukh oo kale. Xage sare marka laga soo tiriyo, 1: Caafimaadka iyo daryeelka, 2. Shaqada, ganacsiga iyo horumarinta dhaqaalaha, 3. Daryeelka bulashada. 4. Socdaalka iyo qaxootiga, 5. Gadiidka, 6. Ciyaaraha iyo dhaqanka, 7. Nidaamka cadaalada.]

## Isku-xirka qaybaha



# 6. Maxay tahay waxbarashada loo dhan yahay?

Madaama dhammanteen aan leenahay khibrado iyo fikrado kala duwan oo ku saabsan waxbarashada loo wada dhan yahay, sida dhabta ah, habka waxbarashada loo wada dhan yahay, ardaygu marna ma aha dhibta, hase yeeshee markasta nidaamka ayaa dhib ah.
Nidaamka waxbarashada ayaa dhib ah, sababtoo ah ma aha mid gadgadoomi kara oo leh hal-abuur qofkasta baahidiisa dabooolaya.Nidaamku waxa uu u baahan yahay inuu la qabsado xaalada, ee ma aha in ardaygu la qabsado xaalada.

Sawirada boggoga soo socada waxay bixinayaan laba hab oo kala duwan oo aan u arki karno sida ardayga looga faquuqay waxbarashada.


Sawirka koowaad waxa uu muujinayaa sida habka qadiimka ah ee nidaamka waxbarashadu uu ugu arko ardayda oo siyaabo badan u kala duwan. Macallimiinta ka shaqaysa dugsiyada aysan ka jirin waxbarashada loo wada dhan yahay waxay magac u bixiyaan ardayda aan si fiican wax u baranayn oo aan darajo fiican keenin. Tusaale ahaan ardayda baahiyaha gaarka ah leh. Dhaqan ahaan waxaa loo arkaa in dhibtu ay tahay ardayga.Arrintani waxa ay keenaysaa in macallimiinta iyo dugsugu ay isku dayaan in sameeyaan xaalada ay ardayga wax kaga bedelayaan oo ay isku dayeyaan in uu ku la qabsado nidaamka jira.

Jaantuska labaad 'Dhibtu waa nidaamka waxbarashada' waxa uu muujinyaa aragti kale. Halkan ardaydu ma aha dhib. Nidaamka waxbarashada ayaa dhib ah, sababtoo ah ma aha mid gadgadoomi kara oo leh hal-abuur qofkasta baahidiisa dabooolaya. Nidaamku waxa uu u baahan yahay inuu la qabsado xaalada, **ee ma aha in ardaygu la qabsado xaalada.**

## Dhibtu waa ardayga




[Sharaxaada sawirka: Gabar fadhida dhulka oo wejiga jilbaha ku haysa oo aan wejigeeda la arki karin. Afar gacmood ayaa afarta dhinac ka tilmaamaya sawirka. Afar summadaha hadalka ayaa gacmaha u dhexeeya. Summadaha hadalku waxa ay leeyihiin;" qoyskeedu kama faa'iideen', 'waxba lama bari karo', 'aad u gaabis ah' iyo 'waxba ma baran karto'.]


Anshaxa macalimiinta ayaa hoos u dhigaya guusha ardayda
Tababarka macalimiinta oo hooseeya
Hab aan is bedeli karan, manhaj aan is bedeli karin lagama helayo baahida ardayda
Mushkiladu waa nidaamka waxbarashada
Agabka barista lama hayo
Deegaan aan la tegi karin
Waalidiinta lagama qayb gelin.
Arday badan oo dugsiga ka haray, arday badan oo dhacay, sidaas darteed waxbarashadu waxa ay u baahan tahay horumarin.
Dawlada ma taageerto Macalimiinta iyo dugsiga, sidaas darteed ma dabooli karaan baahida ardayda.


[Sharaxaada sawirka: sawirka sare waxa uu muujinayaa jaantus ay dhexda kaga qoran tahay ‘dhibtu waa nidaamka waxbarashada’ oo ay xariiqo ku xireen todobo sanduukh oo oo ku wareegsan. Marka laga soo tiriyo xaga sare, 1. Dabeecadaha macallimiinta oo ardayga ka hor istaaga inuu guul gaaro, 2. Manhajka iyo habka adag oo aan daboolayn baahida ardayda oo dhan, 3. Deegaan aan la tegi karain, 4. Ardayda badan oo dugsiga ka harta, kuwo fasalka aan ka gudbin, taas oo muujinaysa in loo baahan yahay in la horumariyo nidaamka waxbarashada, 5. Dawlada oo aan taageerin dugsiyda iyo macallimiinta si ay u daboolaan baahida ardayda, 6. Waalidka oo aan laga qayb-gelin waxbarashada caruurtooda, 7. Agabka iyo qalabka barista oo aan la halayn, 8. Tayada tababarka macallimiinta oo yar, taas oo macnaheedu yahay in aan la daboolin baahida ardayda.]


[Sharaxaada sawirka: Sawirka ku yaal bogga soo socda waxa uu muujinayaa sided tusaale oo kala duwan oo ku saabsan in dhibtu ay tahay nidaamka waxbarashada. Tusaalooyinka qaarkood waxa ay la mid yihiin kuwii jaantuskii hore lagu soo arkay, qaar kalena waa ay ka duwan yihiin. Marka xaga sare laga soo tiriyo:


- Tusaalaha koowaad waxa uu muujinayaa wiil xiran dharka dugsiga oo boors dhabarka ku sita oo jaranjar koraya. Erayga ‘DUGSI SARE’ ayaa ku qoran xaga saree e jaranjarada. Saddex caruur ah ayaa taagan xaga hoose ee jaranjarada. Caruurta waxaa ka mid ah mid aan xirnayn dharka dugsiga, kaas oo kor u eegaya wiilka xaga sare u socda. Mid ka mid ah caruurta waxa uu sitaa muraayadaha indhaha oo madow ah, oo waxa uu gacanta ku haystaa ul, isaga oo u jeed dhinaca kale. Gabar baa cunug dhabarka ku sida. Erayga ‘DUGSI HOOSE/DHEXE’ ayaa ku qoran xaga hoose ee jaranjarada.
- Tusaalaha labaad waxa uu muujinayaa caruur labo saf ku jirta, mid waa gabdho, midna waa wiilal, oo ay ka mid yihiin mid ul ku socda iyo labo caruur ah  oo uu baras ku dhacay. Waxa ay taagan yihiin banaanka suuliyada, iyagoo sugaya inay suuli galaan. Dhismaha suuliyadu waa kuwo burbursan. Dhinaca bidix, waxa jooga cunug ku kaadshada meel dugsiga gadaashiisa ah. Dugsiga dhismihiisu ayaa gadaal ka muuqda.
- Tusaalaha saddexaad waxa uu muujinayaa wiil ku fadhiya gaariga naafada oo uu isagu  leeyahay oo dhulka eegaya. Jaranjaro ayaa ka horeysa albaabka si loo galo fasalka. Albaabka waxaa ka muuqda macallimad wax dhigaysa.
- Tusaalaha afraad waxa uu muujinayaa haweenay taagan arday fadhida kuraastooda. Waxa ay tilmaamaysaa horey, oo waxa ay la hadlaysaa


ardayda ka dambeeya. Dhinaca hore ee fasalka, arday ayaa daaqada eegaya, mid kalena waxa uu ku jiifaa gacmihiisa.

- Tusaalaha shanaad waxa uu muujinayaa saddex oo is dul saaran, qalin-qori, qalin iyo tirtire oo ay ku wareegsan tahay goobo ay dhexda ka kala bartay xariiq.
- Tusaalaha lixaad waxa uu muujinayaa gabar qaangaar ah oo aan xiranayn dharka dugsiga oo cunug xanbaarsan. Waxa ay taagan tahay bannaanka dugsiga oo waxa ay eegaysaa dugsiga. Waxay u eg tahay mid caraysan. Labo gabdhood oo dharka dugsiga xiran oo dugsiga hortaag ayaa gabdha oo isla hadlaya oo gabadha eegaya.
- Tusaalaha todobaad waxa uu muujinayaa fasal arday badan fadhido. Macallin ayaa ka muuqda fasalka hostiisa, isaga oo tilmaamaya qoraal ku qoran sabuurada. Derbiyada iyo daaqadaha fasalku waa kuwo burbursan.
- Tusaalaha sideedaad waxa uu muujinayaa labo sawir oo ay u dhaxayso xariiq guduudan. Sawirka dhinaca bidix waxa uu muujinayaa dhisme ay ku qoran tahay erayda ‘SIYAASADA WAXBARASHADA’. Waxaa ka dambeeya derbi silig ah. Dhinaca daaqadaha waxaa yaalo xirmooyin waraaqo ah oo aan aan safnayn. Sawirka midig waxa uu muujinayaa nin iyo haweenay hortaagan mudule. Gacmaha ayey kor u taagayaan, sidii dad aan is fahmin. Cunug hal lug leh ayaa ku jiifa sali bannaanka yaala.]









# Dhibtu waa nidaamka waxbarashada










## Waa maxay farqiga u dhaxeeya waxbarashada gaarka ah, mida kala qoqoban, tan isku-dhafan iyo waxbarashada loo wada dhan yahay?


In badan, waxbarashada loo wada dhan yahay iyo mid isku-dhafan waa kuwo laysku khaldo, hase yeehsee ma aha kuwo isku mid ah. Waxbarashada loo wada dhan yahay waa ay ka baaxad weyn tahay in caruurta la faquuqo ay dugsiyada dhigtaan. Waa inay ka qayb galaan oo guul ka garaan waxbarashada. Si arday kasta uu uga qayb-galo oo uu guul waxbarashada uga gaaro, waxaan u baahanahay habka barista iyo barashada ee uu araygu xudunta u yahay iyo tayo wanaagsan.

### Waxbarashada gaarka ah ama kala qoqoban

Waxaa jira nidaam waxbarasho ee ardayda caadiga ah(qoton goobo ah)  iyo nidaamka ardayda baahida gaarka ah leh(qotonka afar-geeska ah).



Dugsiyada caadiga ah




Dugsiyada gaarka ah

[Sharaxaada sawirka: Jaantuskani waa loox dhexda ku leh godad goobo ah iyo qotono madax  goobo ah leh  oo ka soo baxaya godadka. Waxa ay matelayaan dugsiyada caadiga ah. Looxa kale waxa uu leeyahay godad afar-geesle ah oo ay ka soo dhex baxayaan qotono afar-geesle ah. Waxa ay matelayaan dugsiyada waxbarashada gaarka ah. Qotonadu waxa ay matelayaan arayda.]

### Isku dhafan

Halkan, dadku waxa ay isku deyayaan inay bedalaan ardayga, si uu ugu haboonaaydo nidaamka waxbarashada caadiga ah(qotonada afar-geeslaha ah ayaa laga dhigayaa goobo). Nidaamka waxbarasho iyo habka barista iyo barashadu waxa uu ahaanaya mid isku mid ah. Sidaas darteed ardaygu waa in uu nidaamka la qabsado ama uu ka haro waxbarashada.




Dusgiga iskudhafan

[Sharaxaada Sawirka: Jaantuskan waxa uu muujinayaa loox ay godadkiisa ka soo dhex baxeen qotono madaxoodu goobo yahay. Qotan kaliya ayaa ka haray, kaasoo madaxiisu yahay afar-gees, kaasoo matelaya ardayda baahida gaarka leh. Qotonka madaxiisa waxa laga dhigayaa mid goobo ah, sidaas darteed waxa uu soo geli karaa godka looxa. Jaantuskani waxa uu matelayaa dugsiga isku-dhafan.]

## Waxbarashada loo wada dhan yahay

Halkan, dhamman ardaydu waa ay kala duwan yihiin oo ardayda oo dhan sida awoodooda ah ayey dugsiga wax uga baran karaan. Nidaamka waxbarashada ayaa la bedelay si uu arday kasta u soo dhoweeyo. Nidaamku waxa uu ka gudbay caqabadihii barashada iyo ka qayb-galka, ha ahaato hab dhaqan, xaalada deegaanka oo liidata, siyaasad iyo fulin aan haboonayn ama agab iyo adeeg la'aan.



Dusgiga waxbarashada loo wada dhan yahay

[Sharaxaada Sawirka: Jaantuskani waxa uu muujinyaa loox leh godad qaabkoodu kala duwan yahay oo ay ka soo dhex baxayaan qotono qaabab kala duwan leh. Waxaa uu matelayaa dugsiga waxbarashada loo wada dhan yahay, halka ardayda oo dhan ay wax wada baran karaan.]

## ‘Arrintani ma tahay waxbarashada loo wada dhan yahay?’ Dhacdo

Akhri mid kasta oo ka mid ah sheekooyinka soo socda oo go’aanso in ay tusaale u yihiin waxbarashada loo wada dhan yahay, mid isku dhexjirta, mida gaarka ah ama mid faquuq ah.

**Sheeko 1:** Gabdho qaar ay yihiin naafo ayaan iman dugsiga, sababtoo waa ay xanuunsadeen. Baaritaan ka dib waxaa la ogaaday in aysan weligood musqulaha geli jirin markii ay dugsiga yimaadaan, taas oo saamaysay caafimaadkooda. Gabdhuhu waxa ay ka baqeen in loo caga jugleedo ama ay musqulaha ku soo weeraraan ardayda wiilasha ah ama rag bulshada deegaanka ka mid ah. Qaar ka mid ah gabdhaha naafada ah ma geli karaan musqulaha. Markii ay gabdhahu u dacwoodeen maamulaha dugsiga, waxa uu la xiriiray urur taageeri jiray waxbarashada bulshada oo waxa uu u hagaajiyey albaabadii qafilo leh oo mid ka mid ah musqulaha waxa uu u yeelay biraha gacan qabsiga. Ka dibna waa uu xiray si aysan u gelin wiilsha ama rag kale oo gabdhaha keliya ayaa furaha la siiyaa. Maamulaha ayaa furaha haya, sidaas darteed gabdhuhu waxa ay weydiistaan furaha markii ay doonaan si ay u galaan musqulaha.

**Sheeko 1: Tani waa faquuq -** hase yeeshee ma aha mi loogu talo galay. Maamuluhu waxa uu isku dayey in uu xaliyo dhibta keentay in gabdhaha laga faquuqo, hase yeeshee nasiib daro xalkii ayaa sababay faquuq.

**Sheeko 2:** Macallimad wax u dhigta fasal 50 arday fadhiso. Habka barista ee ay taqaano waa in ay fasalka hor istaagto oo ardayda la hadasho. Waxa ay ogaatay in arday badan aysan fahmin waxa ay u dhigayso. Marka laga soo tago caqabada ah in fasalka kuraastiisu liidato, waxay isku dayday inay habayso sida ay ardayda u fadhido, hase yeeshee waxa ay horey fariisisay ardada dhaqso wax fahanta, oo inta badan ardaydaydaas horey fadhida ayey wax weydiisaa, sababtoo ah ardayda fadhida fasalka gadaashiisa lama socdaan casharka.

**Sheeko 2: Tani waa waxbarashada isku dhex jirta.** Macallimadu waxa ay u ogolaatay ardayda waxbarashada la hardamaya inay fasalka wax ka bartaan, hase yeeshee ma samayn sidii ugu haboonayd, sidaas darteed ardaydu waxa ay dhigtaan fasalka, iyagoo aan wax ka qayb gelin oo aan wax baran. Waxa ay samaysay isku-day si ay ardayda uga qayb-geliso waxbarashada (habaynta fadhiga ardayda), hase yeeshee waa ay niyad jabtay markii aysan helin wax natiijo ah, intii ay isku dayi lahayd xalal kale.

**Sheeko 3:** Macallin ayey ku adkaatay inuu xakmeeyo koox wiilal ah ee fasalkiisa. Waa kuwo caajisay oo aan fasalka ka fariisan oo waxay dhibeen macallinka iyo ardayda qaarkeed. Macallinku waxa uu u saaray fasalka dibadiisa markii ay fasalka dhibeen. Macallinkii waa ka niyad jabay oo wiilashu si fiican wax uma baranayaan. Maamuluhu waxa uu go'aansaday in uu fasal gaar ah u sameeyo ardayda rabshada badan, sida wiilashaas oo kale, hase yeeshee waxa dhib noqotay in loo helo macallin wax u dhiga fasalkaas, sidaas darteed wiilashii si tartiib ah ayey dugsiga uga hareen dhammaantood.


**Sheeko 3: Tani waa kala soocida waxbarashada-** Wiilasha waxa laga faquuqay fasaladii caadiga ahaa. Xalku waxa uu noqday in laga faquuqo waxbarashada, hase yeeshee taasi ma shaqaynin, oo wiilashii waxa ay ka baxeen dugsiga, sidaas darteed mar kale ayaa laga faquuqay dusgiga.

**Sheeko 4:** Yuusuf waxa ku adag barashada, waxaa ku adag xisaabta iyo akhris-qoraalka. Yuusuf waxa uu u baahan yahay in si gaar ah wax loogu sharxo, wax aka socda fasalka. Arrintani waa ay ku adkaatay macallinkii, maadaama ay fasalka dhigato 40 arday oo uu macallinku ka shaqaynayay meelaha fogfog ee ay ku yar yihiin macallimiintu. Si kasta ha ahaatee, macallinku waxa uu Yuusuf ku daray arday kale oo jecel ciyaarta, kaas oo keligiis si wanaagsan wax u sameeya. Macallinku waxa uu Yuusuf u ogolaaday in imtixaanka afka ah laga qaado. Macallinkii waxa uu helay qof bulshada ka mid ah oo ku shaqeeya xisaabiye. Ninkaas waxa uu tagaa dugsiga oo waxa uu si iskiis todobaad kasta hal saac uga shaqeeyaa dusgiga, gaar ahaan maadada xisaabta oo waxa uu caawiyaa Yuusuf iyo ardayda kale oo ay xisaabtu ku adag tahay.

**Sheeko 4: Tani waa waxbarashada loo wada dhan yahay-** Macallinku waxa uu adeegsanayaa habka ah in ay arday labo-labo isku caawiso si loo caawiyo Yuusuf, imtixaan siyaabo kala duwan loo qaadayo iyo hab hal-abuur leh si Yuusuf iyo arday kale loo siiyo taageero marka ay u baahdaan.


**Sheeko 5:** Haliimo waa 7 jir qabta xanuunka wax u dhima korida maskaxda iyo jirka caruurta. Waxa ay oran kartaa erayo kooban, hase yeeshee inta badan gacanta ayay ka hadashaa oo waxay aasaaska summadaha hadalka ka baratay adeerkeed oo maqalka naafo ka ah. Caruurta kale waxa ay jecel yihiin inay la ciyaaraan, sababtoo ah waa qof kaftan badan oo firfircoon oo ay ardaydu fahmi karaan. Xaliimo macallinkeedu waxa uu u arkaa inay tahay qof shaactiroole ah oo waxa uu doorbidayaa in waalidkeed ay guriga ku hayaan, sababtoo ah macallinku waxa uu ka baqayaa inay ardayda kale ka mashquulinayso waxbarashada. Sababtoo ah Xaliimo si fiican uma hadli karto, macallinku wax su'aal ah weligii ma weydiin oo waxa ay rabto ayey samaysaa.

**Sheeko 5: Tani waa waxbarashada isku-dhafan-** Xaliimo waxa loo ogolaaday inay fasalka timaado, hase yeeshee macallinku ma taageerin sidii ay fasalka ugu qayb qaadan lahay oo wax u baran lahayd.




[Sharaxaada Sawirka: Sawirku waxa uu muujinayaa shan xayawaan oo safan geed hortiisa. Marka laga soo tiriyo bidixda, waa shambir, daanyeel, shirbir-badeed, maroodi, kaluun weel ku jira, ey badeed iyo ey. Nin ayaa fadhiya miis horyaala xayawaanka. Waxa uu leeyahay 'si cadaalad wax loogu doorto, waa in cid kasta laga qaado imtixaan isku mid ah: fadlan kora geedka'.]

**Sinnaan– In dadka si siman loola dhaqmo, iyada oo aan la eegayn baahida gaarka ah ee qofka maaha mid mar walba sax ah oo ma aha mid keenaysa ka wada qayb gal loo dhanyahay.**




[Sharaxaada sawirka: Sawirkaan waxaa loo kala qaybiyey labo. Sawirka bidixda waa saddex oo bannaanka dayr ka fiirsanaya tartan kubada cagta. Mid baa dheer oo ku taagan sanduukh oo waxa uu ka dheeraaday dayrkii, mid gaaban ayaa  isna ku taagan sanduukh oo madaxiisa ayaa wax yar ka dheer dayrka. Qofka saddexaad waxa uu ku fadhiyaa gaariga naafada oo derbiga ayaa ka qariyey ciyaarta. Sawirka midigta ah, waa saddexdii qof. Hadda midka dheer kuma taagna sanduukh iyo wax kale, oo weli madaxiisu waa ka dheer yahay derbiga. Midka gaaban waxa uu ku taagan yahay labo sanduukh oo si fiican ayuu wax uga arkaa derbiga korkiisa. Gaariga naafadu waxa uu saaran yahay jaranjaro dheer, sidaas darteed qofka ku fadhiya gaariga naafada si fiican ayuu wax uga arkaa derbiga korkiisa.]


**Waxbarashada loo wada dhan yahay waxay u baahan tahay ‘simitaan’ – dadka oo loola dhaqmo si kala duwan oo ku xiran baahidooda.**

# 7. Caqabadaha waxbarashada loo wada dhan yahay

Marka aan ka fekerayno caqabadaha haysta ka-qayb-galka waxbarashada, inta badan waxaan markiiba ka fekernaa caqabadaha degaanka sida jaranjar, iyo in uusan jiran meelo ay ay kagalaan fasalka ardayda naafada ah. Sidaas darteed, caqabada ugu weyn ee hortaagann in qofkasta ka qayb-galo waxbarashada ma aha mar kasta mid muuqata- waxaa sababi kara aragti khaldan, siyaasada dawlada ama dugsiga oo takoor ah, ama habka wax barista oo aan fududaynayn ka-qayb-galka ardayda oo dhan. Qaar kamid ah carqabadaha waxay u baahayihiin lacag sida in ladhiso fasal ama buug ladaabaco, balse caqabadaha qaar waa lagu xalinkaraa iyadoo si taxadar leh loo isticmaalayo wixii lahaysto amase la raadiyo xal aan u baahneyn qarash badan.


## Noocyada caqabadaha ka-wada-qayb-galka

**Caqabadaha deegaanka:** Sida dhismaha dugsiga, deegaanka dugsiga ku wareegsan, suuliyada, wadada oo aan la mari karin, dugsiga oo meel fog ku yaal, iyo jidka oo laga cabsado.



[Sharaxaada sawirka: Wiil ku fadhiya gaariga naafada ee uu leeyahay, oo fiirinaya dhulka. Waxaa dhiniciisa ah jaranjaro dhowr salaan leh oo loo baahan yahay inuu koro si uu fasalka u galo. Albaabka waxaa ka muuqata macallimad wax dhigaysa.]

**Caqabadaha la xiriira dabeecada/hab-dhaqanka:** sida cabsi, xishood, quus, waxa laga filanayo oo yar, iyo dabeecada taban ee macallimiinta, waalidka iyo bulshada ay ku dhaqmaan.



[Sharaxaada Sawirka: nin hor fadhiya miis ay dul saaran tahay ciyaarta shaxda. Wiil da' yar oo dharka dugsiga xiran oo ninka u taagaya warqado wax ku qoran yihiin. Ninku hortiisa ayuu u jeedaa oo gacan ayuu kor u isaga taagayaa xaga wiilka. Waxa uu u muuqdaa mid caraysan.]




[Sharaxaada sawirka:  Dhinaca bidix ee hore, waxaa ka muuqda saddex wiil oo dhalinyaro ah oo dhulka fadhiya, oo hortooda ay yaaliin kabo. Wiilashu waxay tirtirayaan kabaha. Wiilka bidixda u xiga waxa hortiisa taal ulo lagu socdo. Wiilasha hortooda, nin ayaa kursi ku fadhiya, oo lugiisa kor u haya si kabaha loogu tirtiro. Gadaal waxaa ka muuqda dukaamo iyo dad adeeg gadanaya. Dugsi ayaa gadaal ka muuqda sidoo kale.]

**Caqabadaha la xiriira siyaasada:** sida jadwalka dugsiga oo aan dabacsanayn, afaf kale oo aan dugsi laga baran iyo sharciyada iyo siyaasada waxbarashada oo dib u eegid lagu sameyn waqti dheer.



[Sharaxaada sawirka: Sawirku waxa uu muujinayaa nin hor taagan fasal oo ul dheer haysta. Waxa uu u eg yahay mid careysan. Usha waxa uu ku fiiqayaa arday hortiisa taagan. Wiilku madaxa ayuu hoos u foorariyey. Ardayda fasalka ku jirta ayaa fiirinaya. Garoonka dugsiga bannaankiisa ah waxaa taagan wiil oo aan qoraxda hark a gelin.]

**Caqabadaha la xiriira /fulinta:** sida isla falgal iyo is caawin la'aan, ka qayb-gal barista iyo barashada oo jirin iyo fahan la'aan la xiriirta hababka kala duwan ee wax loo barto.




[Sharaxaada sawirka: Haweenay taagan ardayda horteeda oo sabuurada wax ka akhrineysa oo la hadlaysa ardayda dharbarkeeda fadhida. Arday fasalka hortiisa fadhiya ayaa daaqada eegaya, mdi kalena gacmihiisa ayuu barkaday kuwo kalna waa iska sheekeysanayaa oo casharka lama socdaan.]

**Caqabadaha xogta:** sida waalidka oo aan ogeyn inay caruurtoodu dhigan karaan dugsiga deegaankooda, siyaasada waxbarashada loo wada dhan yahay oo aan la dhaqan gelin, dugsiga oo si toos ah aan ula xiriirin qoysaska iyo waalidka oon la socon waxa kajira dugsiyada.





[Sharaxaada: Sawir xariiq cas lagu kala teeday.  Sawirka bidixda wuxuu muujinayaa dhisme ay ku qoran tahay SIYAASADAHA WAXBARASHADA. Waxaa ka dambeeya dayr silig ah. Daaqadaha waxaa ka muuqda xirmooyin waraaqo ah oo si nidaam ah u safan. Sawirka dhinaca midig ka muuqda nin iyo haweenay hor taagan guri mudul ah. Gacmaha ayey taagayaan sidii dad aan is fahmayn xogna kama hayaan dugsiga. Sali guriga hortiisa yaala waxaa ku jiifa cunug hal lug leh.]

**Caqabadaha Khayraadka:** Sida, tirada macallimiinta oo yar, ardayda fasalka oo tiro badan, agabka barista iyo barashada oo yar, suuliyo nadiif ah oo la geli karo oo aan jirin.



[Sharaxaada sawirka: Fasal buux dhaafay oo ay ardaydu si isku dhow u wada fadhiyaan. Macallin ayaa ka muuqda xaga hore, isagoo tilmaamaya sabuurad wax ku qoran yihiin. Derbiyada fasalka iyo daaqaduhu way burbursan yihiin.]




[Sharaxaada sawirka: waxa uu muujinayaa caruur labo saf ku jirta, mid waa gabdho, midna waa wiilal, oo ay ka mid yihiin mid ul ku socda iyo labo caruur ah oo uu baras ku dhacay. Waxa ay taagan yihiin banaanka suuliyada, iyagoo sugaya inay suuli galaan. Dhismaha suuliyadu waa kuwo burbursan. Dhinaca bidix, waxa jooga cunug ku kaadshada meel dugsiga gadaashiisa ah. Dugsiga dhismihiisu ayaa gadaal ka muuqda.]



[Sharaxaada sawirka: Dhinaca bidix ee sawirka waxaa ka muuqda teendhooyin badan oo waaweyn oo cadad oo isku daba taxan.  Teendhada ugu horeysa waxaa ka muuqata haweenay tilmaamaysa sabuurada iyo koox caruur ah oo dhulka fadhida oo fiirinaya haweenayda. Teenda waxaa teedan derbi silig ah oo dheer. Dhinaca midig, waxa jooga saddex askari iyo kaare. Qashin ayaa dhulka yaala.]

## Joogitaanka, ka-qayb-galka iyo guul gaarista,

- Waxbarashada loo wada dhan yahay ma aha in ay ardayda naafada ah dugsiyada dhigtaan. Hase yeeshee waxa weeye in la hubiyo in arday kasta (gabar, wiil, ardayda ka timi dadka la hayb sooco, qaxootiga, barakacayaasha, dadka maganta ah, ardayda caafimaadka ay dhibtu ka haysato, ardayda naafada ah iyo kuwa aan naafada ahayn, caruurta agoonta ah, kuwa derbiyada ku nool, iyo kuwa shaqeeya, iwm.) in ay dugsiyada aadaan, si firfircoon ugaa qayb-galaan waxbarashada iyo arrimaha bulshada oo intii awoodooda ah ey guul ka gaaraan waxabarashadooda.



[Sharaxaada sawirka: Horey waxaa ka muuqda labo gabdhood, mid waxa ku dhacay cudurka baraska, waxay fadhiyaan dhulka, iyagoo qoslaya oo ay dhexdooda taalo warqad weyn oo ay qoraal iyo sawiro ku qoran yihiin. Gadaal waxaa ka muuqda labo wiil, mid baa ul ku socda, warqad weyn oo derbiga ku dhegan ayey wax ku dhejinaayaan. Dhinaca midig, waxaa ka muuqda arday oo miis dhicanyada ka fadhiya, labo waa gabdho, midna waa wiil. Macallin ilka cadaynaya ayaa ag taagan. Dhammaantood waxay ay ku jiraan fasalka, iyagoo haysta warqad wax ku qoran yihiin oo derbiga lagu dhejinayo.]

Sidaas darteed, marka aynu doonayno in aan fahano caqabadaha waxbarashada loo wada dhan yahay, waa in aan lafo-gurnaa:

- Caqabadaha ardayga ka reebaya in uu **joogo** (dhigto) dugsiga.
- Caqabadaha ka reebaya **ka-qayb-galka** wax ka barashada fasalka
- Caqabada ka reebaya in ardaygu uu gaaro guul ku salaynsan awoodiisa (xasuusnow in aan guusha lagu cabirin imtixaanka oo kaliya, waxaase ka mid ah xirfadaha bulshada, cayaarta iyo iwm).

Boggaga soo socda waxaa ku qoran sawiro kala duwan oo ku saabsan arday muujinaysa tusaalooyin kala duwan oo ku saabsan waxbarashada loo wada dhan yahay amase caqabadaheeda.

Qof kasta si ayuu u fahmaa xaalada markaa taagan. Ardayda, macallimiinta, waalidka, iwm waxaa suurogal ah in ay siyaabo kala duwan u fahmaan xaalad keliya, taas oo ay keenta aragti kala duwanaanta ku saabsan caqabadaha iyo xalalkooda.

Faahfaahinta hoose waa sawiro sharxaya waxay muujinayaan, sida ay ula muuqato qofka sawirka qaaday.



- Tani waa wado khatar ah oo ay ardaydu goyso si ay dugsiga u tagaan.
- Baarbuurta si xowli ah ayaa loo wadaa. Wadayaashu waxay u baahan yihiin in lagula taliyo in ay tartiib u socdaan marka ay dugsiyada ag marayaan.

[Sharaxaada sawirka: Labo wiil iyo gabar gacmaha is haysta. Waxa ay goynayaan wado. Gaarigu aad ayuu ugu soo dhowaaday.]



- Karadoorkan oo kale waxa uu dugsiga ku yahay caqabad, halkaas oo qaar ka mid ah arayda ay kula dagaalamaan aradyda ka yar yar ama tababarta daran.

[Sharaxaada Sawirka: Labo wiil oo taagan meel madow oo u dhow karadoorka. Mid baa ku tiirsan derbiga.]



- Biyo nadiif ah oo la heli karo waa loo baahan yahay. Biyo la'aan ardaydu, waxa ay oranayaan; biyo lama helo maalintii oo dhan, gacmaha ma dhaqan karno, marka suuliga laga soo baxo, taasoo keeni karta cudur, iwm.
- Meesha tuubadu ku taal waa meel jajaban, sidaas darteed cid kasta biyo kama dhaansan karto, tusaale ahaan, waa meel aysan biyo ka dhaansan karin ardayda araga naafada ka ah iyo kuwa adeegsada gaariga naafada.

[Sharaxaada sawirka: Laba baaldi oo bir ah oo biyo ka buuxaan oo tuubo biyood ag yaala. Meesha tuubadu ka taagan tahay waa dhul ay dhagxan badan yaaliin.]




- Waxa jira suuliyo kale oo ay gabdhuhu leeyihiin oo aan ka muuqan sawirkan.
- Ardayda sawirka qaaday waa ay faraxsan yihiin, maxaa yeelay hadda waxa ay haystaan suuliyo, hadda ka hor waxaa loo kor tegi jiray bannaanka, haddase waxa la galaa suuliyada.

[Sharaxaada sawirka: Waxaa jira dhul furan oo balaaran oo garoon ah. Waa dhul bannaan oo aan waxba ka beernayn. Saddex suuli oo kala go'an oo is dhinac yaal ayaa ka dhisan. Dhisme kasta waxa uu ka kooban yahay labo suuli oo isku dhegan.]



- Buuggaag aan la adeegsan karin: Ardaydu si fudud uma heli karaan buuggaagta, sababtoo ah sida loo dhigay iyo meesha la dhigay darteed. Kuma jiraan buuggaag ku qoran farta baaraylka, waa buuggaag farta caadiga ah ku qoran oo keliya.
- Hadii buug badan la heli karo waxaa yaraanaya buugta ay ardaydu wadaagto waana wax fiican.

[Sharaxaada sawirka: Halkan waxaa ka muuqda saddex khaanadood. Buuggaag badan ayaa joog ahaan loo safay khaanadaha. Khanaduhu waa ay buuxaan. Ciwaanda buuggaagta lama arki karo.]

# 8. U-qareemaha waxbarashada loo wada dhan yahay

## Waa maxay u-qareemid?




***Ma aha mid suuragal ah markasta ilaa la sameeyo***
**Nelson Mandela**

[Sharaxaada sawirka: Waa sawirka Nelson Mandeela. Sawirka hoostiisa waxaa ku qoran oraah uu yiri oo ah "Ma aha mid suurogal ah markasta, ilaa la sameeyo".]

- U qareemigu waa **in tilaabo ficil ah la qaado** si is-bedel u dhaco oo aan dhammaanteen u qareeno marka aan doonayno in isbedel dhaco, haba ahaado mid yar.
- U qareemida waxa inta badan ka mid ah in **dadka laga caawiyo in codkoodu** keeno is bedel ku saabsan sida ay dadku u fekerayaan(dabeecad) ama sida ay wax u sameeyaan(dhaqan gelin)

## Hoos waxaa ku qoran waxyaabo lagama maarmaan ah oo ku saabsan u-qareemida:

- U-qareemidu waxay ku saabsan tahay saamaynta go'aanka la gaaray (sida siyaasada dusgiga).
- U-qareemidu waa inaad gacan ka geysatosidii isbadal loogu sameyn lahaa sida wax loo qabto(dhaqan gelin), oo ay ku jirto isbadal lagu sameeyo sida dugsiyadu u shaqaynayaan
- U-qareemidu waxa ay noqon kartaa mid hab rasmi ah loo sameeya sida in wax laga qoro siyaasada dawlada iyo mid aan rasmiga hayn (sida in xaquuqda dadka naafada ah looga hadlo masaajiyada).




[Sharaxaada sawirka: Koox dad ah oo ku fadhiya kuraas habaysan oo u jeeda qof hadlaya oo aan sawirka ka muuqan. Kooxda waxaa ka mid ah haweenay ku fadhida gaariga naafada, nin baras qaba oo gacanta kor u taagaya, haweenay xijaaban oo dadka hor taagan oo gacanta taagaysa. Labo qof oo kale oo iska soo horjeeda oo hadlaya. Erayga GOLAHA SHACABKA oo far waaweyn ku qoran ayaa sawirka hoostiisa ku qoran.]

- U-qareemayaashu waa dad sameeya ficil si ay ugu sameeyaan is bedel bulshoo oo wanaagsan.
- U-qareemayaashu waxay ka shaqeeyaan sidii is bedel ugu keenii lahaayeen noloshooda, qoysaskooda, bulshada, dalkooda iyo dunida kale.
- U-qareemayaashu waxaa ka dhexeeya xiriir waxayna raadiyaan isbahaysi si ay u wadashaqeeyaan oo isbadal dhab ah u keenaan.




[Sharaxaada sawirka: Dad taagan oo hadlaya. Haweenayda taagan dhinaca midig waxa ay adeegsanaysaa gacmaheeda si ay wax ugu tilmaanto ninka ka soo horjeeda oo isagu gacmaha wax ka tilmaamaya. Haweenta dhexda ku jirta ee xijaabka waxa ay daawanaysaa labadooda. Gadaal waxaa ah dukaamo, masjid iyo gabar dhar gaduud ah xiran oo riixaysa wiil saaran gaariga naafada.]

## Xirfadaha muhiimka ah ee u-qareemida waxtarka leh

Waxa jira xirfado badan oo kala duwan oo aan u adeegsan karno u-qareemida wanaagsan. Qaar ka mid ah xirfadaha aasaasiga ah ee loo adeegsado cilmi baarista waa mid qiimaha leh: sida fiiri dhibta jirta, ka feker xalkii kadibna samee ficil si aad xal u gaarto.


Jaantuska soo socda waxa uu muujinayaa sida aan u adeegsan karno xirfadaas, si u-qareemidu ay waxtar u yeelato.



F
I
I
R
I
SAMEE
FEKER

[Sharaxaada Sawirka: Jaantusku waxa uu muujinayaa saddex sawir-sumadeed oo ay falaari isku-xirtay oo si goobo ah u sawiran. Sawirka koowaad ee ugu sareeya, oo erayga FIIRI uu ku qoran yahay xarfaha waaweyn oo jaranjarta raacaya sida la arki karo. Dhinaca hoose, waa gaariga naafada. Sawirka labaad ee dhinaca midig ee hoose wuxuu muujinayaa qof gaari naafada adeegsanaya iyo qof kale oo la hadlaya sida sanduukha hadalku muujinayo iyo erayga FEKER oo xarfaha waaweyn ku qoran. Sawirka saddexaad waxa uu muujinayaa qof adeegsanaya gaari naafada, nin iyo naag wada taagan. Naagtu waxa ay gacanta ku haysaa tabeele ay ku qoran tahay SAMEE oo xarfaha waaweynah.]

[Jaantuska ku qoran bogga soo socda waxa uu muujinayaa nooc yar oo ah 'FIIRI-FEKER-SAMEE' dhexda ku sawiran iyo saddex sawir oo ku wareesan. Sawirka ku xiga 'FIIRI' waxa uu muujinayaa nin lug keliya leh, oo xiran suud oo ku soconaya ul. Waxa uu taagan yahay guri bannaankiisa. Albaalku waa furan yahay. Albaabka waxaa taagan haweenayn la hadlaysa ninka. Waxa ay xiran tahay dhar caadi ah. Faraha ayey ka hadlaysaa oo suniyaha ayey ku u taagtay-sidii iyadoo wax sharxaysa. Dhabarkeeda waxaa taagan gabar yar ah oo maro casaan ah dhulka ku tirtiraysa. Sawirka ku xiga 'FEKER' waxa uu muujinayaa shan qof oo isuhu yimi meel ka baxsan geed hoostiis. Afar ayaa ku fadhida kursi, midna waa taagan yahay.  Waa saddex haween ah iyo labo rag ah. Labo haween ah waxa ay xiran yihiin xijaab, nina waxa uu xiran yahay khamiis. Shanta qof waxa ay dhegaysanayaan nin hadlaya. Ninku waxa uu xiran yahay suud, oo waxa uu leeyahay hal lug oo waxa uu ku socda ul. Wuu taagan yahay. Dhinaciisa waxaa yaala sabuurad ay ku sawiran yihiin labo sawir uleed oo yar yar, wiil iyo gabar ku dhex jira guri tarniig saaran yahay.  Dhinaca sabuurada waxaa taagan habeen gacmaha ka hadlaysa. Ninka iyo haweenaydu waxa ay la wada hadlayaan shanta qof. Sawirka ku xiga 'SAMEE' waxa uu muujinayaa sided qof oo bannaanka wada jooga. Qaar baa fadhiya, qaar kalena waa taagan yihiin. Haweenay fadhida ayaa haysata usha ay adeegsadaan dadka araga naafada ka ah. Haweenay taagaan ayaa gacamaha ka hadlaysa oo la xiriiraysa nin. Haween dhar caadi ah xiran ayaa gadaal fadhida. Dadka oo dhan waxa ay fiirinayaan oo ay dhegaysanayaan haweenay si fiican u labisan oo istaagan oo ilka cadeynaysa oo hadlaysa, iyada oo adeegsanaysa cod-baahiye. Waxay gacanta ku haysaa gabar dhar gaduudan xiran oo kabo saandal ah qabto oo boorso xambaarsan. Gabadhu iyada ayey fiirisnaysaa oo waa ay ilka cadeynaysaa. Nin suud xiran oo lug keliya lej waxa uu fadhiyaa kursi ku dhow haweenayda cod-baahiyaha haysata. Ushiisii dhulka ayey taal. Gadaalna waxa muuqda dukaamo, masaajid iyo dad soconaya iyo dad fadhiya dhulka oo soo bandhiyaga xirmooyin dalegyada beeraha ah.]




FIIRI
SAMEE
FEKER






# 9: Samaynta wacyi gelin bulsho oo ku saabsan waxbarashada loo wada dhan yahay

**Samaynta wacyigelin bulsho oo ku saabsan waxbarashada loo wada dhan yahay waxaa ka mid ah:**

- In laga hortago dabeecadaha iyo fahan ka khaladan
- In laysla wadaago xogta iyo tusaalooyinka togan/wanaagsan
- In dadka laga taageero sidii ay ugu fekeri lahaayeen si ka duwan sida ay hadda uga fekeraan ayagana macne usameynaysa.

## Xagee dabeecadaha iyo fahanka laga heysto waxbarashada loo wada dhan yahay ka yimaadaan?




[Sharaxaada sawirka: Sawirkani waxa uu muujinayaa labo goobo oo isku dhex jira. Tan bidix, waxa ay leedahay 'khibrada (wixii inagu dhacay)'. Tan midig waxay leedahay 'Aqoonta (wixii aan baranay)'. Barta ay ku kulmaan ee dhexe waxa ay leedahay 'dabeecadaha iyo fahanka (sidii aan sheyga u ragno oo aan aamino)'.]

## Qaar ka mid ah dabeecadaha muhiinka ah:

- Waa muhiim in la xasuusnaado in qofka iyo fahankiisu ay meel ka timaado.
- Dabeecada waxaa keena qofka KHIBRADIISA/wax uu la kulmey iyo WAXA UU KU SOO BARTAY (dugsiga, qoyska, iyo saaxiibada, iwm).
- In la fahmo khibradahaas iyo in la aqoonsado waxa qofka horey loo soo baray waxay inaga caawinaysaa in aan fahano dabeecadaha wanaagsan iyo fahanka ku saabsan waxbarashada loo wada dhan yahay meesha ay ka timid taas oo iyana inaga caawinaysaa in aan cudur daar u samayno qofka , xitaa haddii aanan ku raacsaneyn dabeecadiisa.
- In la fahmo waxa keenaya dabeecadeena iyo fahankeena aan qabno waxa ay inaga caawinaysaa in la fahmo sababta ay dadka qaarkiis ay ugu fekeraan ama ay u aaminsan yihiin waxa ay sameeyaan.

## Qodobo muhiim ah oo ku saabsan wacyigelinta:

- Ma bedeli karno dadka dabeecadahooda iyo fahankooda taban. Waxaan bedeli karnaa dabeecadeena.
- In aan fahano waxa keenay dabeecadeena waxa ay inaga caawin doontaa in aan la hortagno dabeecadaha taban oo aan xoojino dabeecadaha togan ee dadka kale ee ku saabsan waxbarashada loo wada dhan yahay.
- inaan ahaano dad u-qareema/ololeeya waxbarashada loo wada dhanyahay micniheedu waa inaan isbedal doon nahay si aan u bedelno dabeecadaha iyo fahanka taban oo aan u xoojino dabeecadaha togan.

# 10. Sii wadida barashada waxbarashada loo wada dhan yahay

Caqabadaha iyo xaaladaha adag waxa ay noqon karaan fusrad aan wax ka baran karno oon is bedel ku heli karno.

Markaan wada shaqyno waxaan xal u heli karnaa carqabdaha aan la kulano.



[Sharaxaada sawirka: Waa lix qof oo ku fadhiya kuraas alwaax oo ku wareegsan miis yaala sabuurada horeeda ee fasal. Waa labo nin iyo afar haween ah. Nin ayaa hadalaya oo gacmaha wax ku tilmaamaya. Haweenay baa wax qoraysa. Dadka kale ninka ayey u jeedaan oo dhegaysanayaan.]

- Raadi fursadaha ka jira gobolkaaga/degmadaada si layskula wadaago carqabaha ka jirra waxabarashada loo wada dhan yahay.
- Ogow waxa ay qoysaska iyo waalidiinta deegaanku ka fahmsanyihiin waxa ay tahay waxbarashada loo wada dhan yahay.
- In si wadajir ah loo wada shaqeeya si xal loogu helo caqabadaha aad lakulantaan.
- Booqo dugsiyada tijaabada ah ee gobolkaaga/degmadaada ee qaybta ka ah mashruuca waxbarashada loo wada dhan yahay.